

# *Garashada Xarfaha*

## **Shaxda Ikhtiyaarka**

Ilmahaaga waxa aad u sheegtaa inuu doorto hal ama wax ka badan oo hawlaha hoose ah. Waxa aad samaysaa ikhtiyaar oo waxaad daba gashaa xirfadaha muhiimka ah ee garaadka iyo hormarka dareenka bulshada. **Ka dooro hawlaha soo socda si aad u ogaato waxa uu ilmahaagu ka garanayo xarfaha.**

## **Waxa Loo Baahan Yahay:**

- Warqad, qalin beensal/biilo, birlabta talaagada, ama kaadhka xarfuhu ku qoran yihiin oo muuqda.

Xirfadaha Aqoonta	Ikhtiyaarka Hawsha	
<b>Garashada iyo magacyada dhawr xaraf oo magaciisa ku jira</b>	<b>Magacaaga Qor</b> Ilmahaaga waxa aad u sheegtaa inuu qoro magaciisa isaga oo adeegsanaya xarfada leh birlabta talaagada lagu dhajiyo ama kaadhadhka xarfaha ah.	<b>Maxaa ku jira Magacaaga?</b> Ilmahagaa waxaa aad ka dalbataa inuu ku dhawaaqo xirfadaha magaciisa.
<b>Garo oo uu sheegto ilaa 10 xaraf, gaar ahaan kuwa ku jira magaciisa</b>	<b>Cunto Wada Karin</b> Marka aad diyaarinayso cunto sida bariis, saandhiwij, ama siriyeel, waxa aad isticmaashaan sanduuqyada midhaha kala duwan iyo quruuradaha (tusaale ahaan kartoonada siriyeeliska iyo kartoonada caanaha) kuwaas oo si nasiib ah aad u kala horeysiisay oo waxa aad ilmahaaga waydiisaa inuu garto xirfadaha ku dul qoran.	<b>Kor U Akhrin</b> Marka aad sheekada wada akhriyaysaan, waxa aad ilmahaaga ka dalbataa inuu tilmaamo xirfadaha uu garanayo oo uu kuu sheego magaca xaraf kasta.



**Garashada iyo sheegida  
11-20 xaraf oo waawayn  
iyo 11-20  
xaraf oo yaryar  
marka si nasiib ah  
loogu soo dhigo**

**Dulmarka Godadka  
Xarfadaha**  
Marka aad banaanka u wada  
baxdaan si aad usoo  
lugaysaan ama tukaanka  
qabataan, waxa aad  
ilmahaaga ka dalbataa inuu  
garto xarfaha kala duwan ee  
uu banaanka ku arko. Waydii  
"xarfo nooce ah ayaad  
aragtaa?" Ka caawi ilmahaaga,  
hadii ay ku adag tahay (laakiin  
aanu si sax ah u tirin karin).

**Kaadhadhka Xarfadaha**  
Waxa aad xaraf kasta oo wayn  
ku qortaa warqad afar gees ah  
si aad uga samaysato kaadhka  
xarfadaha ah. Waxa aad ku  
baahisaa kaadhadhka  
xarfadaha ah miiska ama  
dhulka iyada oo xarfadaha  
waawayni ay u jeedaan kor.  
Ilmahaaga waxa aad ka  
dalbataa inuu soo helo xaraf  
kasta oo ay garanayaan,  
sheegaan, oo markaa uu  
kaadhka rogo.



Washington Office of Superintendent of  
**PUBLIC INSTRUCTION**